Soo koobida: Codsiga Cusbooneysiinta Ka-dhaafida 1115 ee Oregon ee 2022-2027

Hordhaca

Taariikhda markay ahayd Febraayo 18, 2022, Oregon waxay codsiga cusboonaysiinta ka-dhaafida 1115(a) ee 2022-2027 usoo gudbisay Xarumaha Medicare iyo Adeegyada Medicaid (CMS). Codsiga Oregon wuxuu sii wadi doonaa waxyaabaha aasaasiga ah ee Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP) iyadoo diiradda la saarayo wax ka qabashada sinnaan-la'aanta caafimaadka ee gobolkayaga, isla markaana la joogteynayo ballan-qaadkayaga ah inaan ku guuleysano caysanaanta guud iyo dib-u-habaynta nidaamka gaarsiinta kaasi oo dhiirigelinayo daryeel tayo sare leh oo kharashyadiisuna xadidan yihiin.

COVID-19 ayaa cadeeyay sinaan la'aanta qotoda dheer ee joogtada ah ee ka jirta nidaamka daryeelka caafimaadka iyo bulshadayada. Waxaan aaminsanahay in diiradda saarida ciribtirka sinnaan la'aanta caafimaadka, iyo sidoo kale si cad isku waafajinta hindisayada kale ee siyaasadda caafimaadka ee gobolkayaga, ay inoo ogolaan doonta inaan si wax ku ool ah u wanaajino natiijooyinka caafimaadka bulshooyinka wajahaya caddaalad darro taariikhi ah iyo mid casri ah.[1] Hadafyada la cusbooneysiiyay iyo horumarrada OHA ee barnaamijka Medicaid ee gobolka waxay salka ku hayaan guulaheenii hore waxayna muujiyaan wixii aan ka baranay la kulanka COVID-19.

Macluumaad Hore

Ka-dhaafida 1115(a) ee Oregon’s 1115(a) waxay bilaabatay 1994-kii oo waana la cusboonaysiinayay oo sare ayaa loo qaadayay tan iyo markaa. Cusboonaysiinta 2012 ayaa bilowday ururada daryeelka isku-duwan (CCO-yada), kuwaasi oo daryeel siiya xubnaha Medicaid iyada oo loo marayo qaab adeeg-bixin oo loogu talagalay in wax looga qabto dhibaatooyinka ka imanaya nidaamka caafimaadka ee kala daadsan.

CCO-yada waxaa bishiiba la siiyaa miisaaniyad go'an oo loogu talagalay adeegyada caafimaadka jireed, hab-dhaqameed, iyo kuwa afka waxaana tani la socda dabacsanaan wax looga qabanayo baahiyada xubnaha ee ka baxsan adeegyada caafimaad ee soo-jireenka ah.

---

[1] Bulshooyinkani waxaa ka mid ah laakiin kuma xadidno, sagaalka qabiil ee Oregon ee federaalku aqoonsan yahay iyo bulshooyinka Qabiilka; Latino/a/x, Madowga/Afrikaanka Maraykanka ah, Aasiyaanka, Reer Jasiirada Baasifik, iyo Hindida Maraykanka/bulshooyinka ah Dhaladka Alaska iyo bulshooyinka kale ee midabka leh; dadka naafada ah; dadka aqoontooda Ingiriisiga ay xadidan tahay; iyo bulshooyinka soogalootiga iyo qaxootiga.

Oregon Health Authority

Miisaaniyadan waxaa sidoo kale kujira dhiirigelin maaliyadeed oo loogu talagalay wanaajinta natiijooyinka iyo tayada. Sandkii 2016, dib u cusboonaysiinta Oregon waxay balaadhisay dadaalkan iyadoo diiradda la saarayo maalgashiga caksiga ah ee waxyaabaha saameeyo caafimaadka bulshada iyada oo la adeegsanayo Adeegyada Caafimaadka Laxiriira (HRS) ee CCO-yada u saamaxayo inay bixiyaan lacagta adeegyada aan caafimaadka quseynin ee wanaajinayo caafimaadka.

Marka laga soo tago guulaha Oregon ay ka gaartay modheelka daryeelka isku-duwan, Oregon waxaa ay sameyn kartaa qasabna ku ah inay si wanaagsan ugu adeegto dadka ay waxyeelada ugu badan ka soo gaarto sinnaan la'aanta caafimaadka Oregon. Xubnaha Qorshaha Caafimaadka Oregon iyo danwadaagtada bulshada ayaa si joogto ah u sheegay baahida loo qabo in OHA ay wax ka qabato sinnaan-la'aanta caafimaadka ee kajirta nidaamka caafimaadka *iyo* bulshooyinka ay xubnuhu ku nool yihiin kana shaqeeyaan labaduba.

Ahmiyadaha/Mudnaanta siyaasadda

Sare u qaad helitaanka caymis joogto ah loona siman yahay

Sahankii caafimaad ee gobolka oo dhan ee ugu dambeeyay ayaa muujiyay in, intii u dhaxaysay 2019 iyo 2021, heerka caymis ee gobolku uu ka soo kacay 94% oo uu gaaray 95.6%, kaasi oo noqday heerkii ugu sareeyay ee la diiwaangeliyo. Intaa waxaa dheer, heerka caymiska ee dadka madow ee Oregon wuxuu ka soo kacay 92% wuxuuna gaaray 95%. Isbeddelkan ayaa inta badan ka dhashay caymiska joogtada ah ee la siiyay xubnaha Medicaid intii lagu gudajiray xaaladda degdegga ah ee caafimaadka dadweynaha ee COVID-19—taasi oo caddaynaysa muhiimadda barnaamijka Medicaid u leeyahay yareynta caymis la'aanta iyo sare u qaadista sinnaanta caafimaadka.

Kaliya haddii la helo caymis joogto ah oo loo siman yahay ayay dadku heli karaan daryeelka ay u baahan yihiin. Dadka midabka leh iyo bulshooyinka la kulma caqabadaha nidaamsan ee ku salaysan sinnaan la'aanta taariikhiga ah ayaa leh heerar caymis oo hooseeya. Habka cusboonaysiinta waxaa ka mid ah diiwaangelin joogto ah oo soconayso laba sano ah oo loogu talagalay dadka waaweyn, diiwaangelin joogto ah oo soconayso shan sano ah oo loogu talagalay carruurta ilaa 6 sano jir; iyo caymis la balaariyay oo loogu talagalay dadka ku nool Oregon ee wajahayo xilliyo kala-guur ah.

Hadda iyo mustaqbalka dhow, OHA waxay si dadaal leh uga shaqaynaysaa sidii ay sameyn lahayd xulashooyin loogu talagalay xubnaha OHP kuwaas oo dhammaadka xaaladda degdegga ah ee caafimaadka dadwaynaha, aanan uqalmi doonin OHP.

Wanaaji natiijooyinka caafimaadka iyadoo la nidaaminayo kala-guurka nolosha iyo caymiska

Xogtu waxay tusinaysaa in dadku inta badan ay lumiyaan caymiska iyo helitaanka daryeelka inta lagu gudajiro kala-guurka nolosha iyo kala-guurka udhaxeeyo nidaamyada, sida kadib markii qofka laga soo sii daayo xabsi ama isbitaalka dawladda. Dadku waxay la kulmaan

hakad ku yimaada helitaanka adeegyada aasaasiga ah ee caafimaadka hab-dhaqameed iyo midka jireed inta lagu gudajiro kala-guuradan, kuwaas oo culeys weyn ku qabto qofka iyo nidaamka. Waxaa intaa dheer, kala-guuradan waxay si weyn u saameeyaan dadka midabka leh waxayna sababaan sinnaan la'aanta caafimaadka. Marka xirmooyin faa'iido oo gaar ah oo wax ka qabanayo buuxinta baahiyada bulsheed sida guriyeynta la siiyo xubnaha ku jira xilliyada isbeddelka, Oregin waxay xaqiijin kartaa inay dadku caymis haystaan, in la daboolo baahiyadooda waxyaabaha muhiimka ah ee gacanta ka geysto go'aaminta caafimaadka lana joogteeyo helitaanka daryeelka iyo daawada, taasoo ugu dambeyntii wanaajineysa natiijooyinka caafimaadka.

U wareeg lacag bixin qiime kusalaysan

Marka la barbardhigo gobolada kale, Oregon waxay kayd federaali iyo mid gobol oo la taaban karo ka soo saartey habkayaga Medicaid. Moodheelkayada CCO-yada ee isku-duwan waa mid hal-abuur leh oo kharashkiisu wax-ku-ool yahay. Si loo joogteeyo loona dhiso guulahayaga, Oregon waa inay sii wadaa dhisida nidaam lacag-bixin oo abaalmarinaya kharash-gareynta sinaanta caafimaad, waxyaabaha gacanta ka geysto go'aaminta caafimaadka bulshada iyo wanaajinta caafimaadka dadka ka faa'iideysto Medicaid iyo CHIP beddelkii kharash lagu ku bixin lahaa hab-raacyada caafimaadka iyo adeegyada oo keliya.

Dhiirageli daryeel loo siman yahay

Moodheelkayaga daryeelka isku-duwan wuxuu ku dhisan yahay dhiirigelinta tayada iyo helitaanka. Tobankii sano ee la soo dhaafay, Oregon waxay caddaysay in lacag-bixinta ku salaysan waxqabadku ay shaqeeyso. Inkastoo lacag-bixinta tayada ku salaysan ay gacan ka geysatay dhiirigelinta horumarinta tayada, sinnaan la'aanta weyn ee ah dhanka tayada iyo natiijooyinka ayaa weli jirta.

Xubnaha OHP iyo xubnaha bulshada ayaa OHA u sheegayo in sinnaanta ay noqoto waxa dhammaan nidaamyada ay diirada saarayaan. OHA waxay soo jeedinaysaa in dib u eegis lagu sameeyo cabbirada si diiradda loo saaro tayada dhaqameed iyo helitaanka caafimaadka loogu talagalay daawaynta cudurada iyada oo sidoo kalena la abuurayo hab cusub oo ah cabbir waxqabad oo ku salaysan sinnaan oo loogu talagalay waxyaabaha saameeyo caafimaadka, markaasi Oregon waxay samayn kartaa horumar la taaban karo oo nidaamka u horseedaya natiijooyin caafimaad oo loo siman yahay.

Wanaaji caafimaadka iyadoo la adeegsanayo maalgelinta sinnaanta diiradda saarayso ee ay hogaaminayaan bulshooyinka

Nidaamku wuxuu wax badan ayuu ka qaban karaa maalgelinta hababka ku saleysan bulshada ee wax ka qabto arrimaha caafimaadka bulshada ee horseedayo sinnaan la'aanta la'aanta caafimaadka. Si wax looga qabto sinnaan la'aanta caafimaadka, Oregon waa inay go'aan qaadashada, awooda iyo kheyraadyada ku wareejisaa bulshooyinka wajaha sinnaan la'aanta.

Oregon Health Authority

Gobolku wuxuu codsanayaa inuu sameeyo maalgashi ku salaysan sinnaanta oo bulshada dib ugu celineyso khayraadyada iyo awooda go'aan qaadashada. Si loo taageero maalgalinada ay bulshadu hogaamineyso ee ku aadan sinnaanta caafimaadka iyo sameynta kaabayaal dhaqaale iyo kuwa xogeed oo muhiim ah oo loogu talagalay hay'adaha bulshada ku salaysan ee bixiya adeegyadan, Oregon waxay codsanaysaa in CMS ay ogolaato kaqaybgalka dhaqaalaha federaalka (FFP) ee loogu talagalay barnaamijyada caafimaadka gobolka ee la qoondeeyay (DSHP).

Oregon ma soo jeedinayso in khayraadyada DSHP loo isticmaalo maalgelinta barnaamijka Medicaid ee asaasiga ah ama in lagu buuxiyo caqabadaha miisaaniyadeed. Taa baddalkeeda, gobolku wuxuu soo jeedinayaa in maalgalinada caafimaadka ee gobolka kaliya leeyahay ee ay sameeyeen Golaha Sharci-dejinta sannadihii la soo dhaafay ay u qalmaan DSHP iyo in kheyraadyada cusub ee federaalka ay isticmaali karaan bulshooyinka ay saameeyeen caddaalad darrada taariikhiga ah, gaar ahaan si wax looga qabto sinnaan la'aanta caafimaadka.

Oregon waxay diiradda saaraysaa maalgalinada ay bulshadu hogaamieyso ee sinnaanta caafimaadka waxayna haddii codsigan la ogolaado tani ay si wanagsan wax uga qaban kartaa caqabadaha waaweyn ee hortaagan wanaajinta caafimaadka, hoos u dhigista kharashyada iyo sinnaanta caafimaadka.

Waafaji ahmiyadaha shuraakada/danwadaagtada Qabiilka

regon waxaa ka go’an inay la shaqayso sagaalka Qabiil ee fadaraalku aqoonsan yahay ee Oregon iyo Barnaamijka Caafimaadka Hindida Magaalada (Urban Indian Health Program (UIHP)) si ay u aqoonsato nidaamyo lagu gaarayo ujeedooyinka daryeelka caafimaad ee Qabiileed iyadoo isla markaana la xushmaynayo dhaqamada soo jireenka ah ee Qabiileed lana xoojinayo xiriirka dowladeed ee ka dhexeeya waddamada madaxa bannaan iyo gobolka. Inagoo adeegsanayno Qabaa'ilka iyo Wadatashiga Qabaa'ilka iyo Shirarka Barnaamijka Caafimaadka Hindida Magaalada, waxaan samaynay siyaasado wanaajinayo natiijooyinka caafimaad ee xubnaha qabaa'ilka ee gobolka.

Codsiyada kale ee cusboonaysiinta:

Oregon waxay codsatay in la joogteeyo in badan oo kamid ah sifooyinka Ka-dhaafida 1115(a) ee haddeer jira oo ay ka mid yihiin:

- Liiska Mudnaanta La Siiyey ee Adeegyada Caafimaadka iyo Guddiga Dib U-eegista Caddeynta Caafimaadka;
- Modheelka daryeelka isku-duwan iyo is-dhexgalka caafimaadka jireed, mid hab-dhaqameed, iyo midka afka;
- Ururada Daryeelka Isku-duwan ee u adeegaya xubnaha ka tirsan bulshooyinkooda;
- Hababka lacag-bixinta ee ku salaysan qiimaha;
- U-heelanaanta tayada iyo helitaanka daryeelka;

- Golayaasha Latalinta Bulshada; iyo
- Hab-maamuuska la-tashiga iyo kaashashada qabiilada ee loogu talagalay CCO-yada iyo OHA.

Waxaa kaloo muhiim ah, Oregon ma raadsan doonto cusbooneysiinta muddo dheer ee ka-dhaafida ku saabsan Baaritaanka Kahortagga ah ee Hore, Ogaanshaha Cudurrada, iyo Daaweynta (EPSDT) loogu talagalay carruurta. Go'aanku wuxuu imaanayaa kagadaal jawaabcelin cad oo katimid bulshada, udoodayaasha, ururrada adeegga carruurta, iyo dhinacyada kale ee danaynaya. Maamulka Oregon wuxuu sii wadi doonaa inuu manaafacaadka OHP ku saleeyo Liiska Mudnaanta Lasiiyay ee Adeegyada Caafimaadka, si kastaba ha ahaatee, gobolka ayaa qabanqaabin doona una diyaarin doona carruurta dhammaan adeegyada lagama maarmaanka u ah caafimaadka ee looga baahan yahay daaweynta xaaladaha la tilmaamay iyadoo qeyb ka ah baaritaanka EPSDT.

Sidoo kale, iyadoo la raacayo dhaqanka haddeer jira ee oggolaanshaha u-qalmida laga bilaabi karo xili la soo dhaafay, Oregon ma raadsan doonto in dib loo cusboonaysiiyo ka-dhaafida saamayso diidmada in caymiska laga soo bilaabo xili la soo dhaafay.

Ugu dambeyntii, iyada oo ku saleysan jawaab-celin laga helay kooxaha daneynayo, OHA waxa ay codsigii ugu dambeeyay ka saartay qaacidada xiran.

Waxaad ku heli kartaa dokumintigaan luuqado kale, daabacaad balaaran, qoraalka camoolka ama qaabka aad doorbidi. Kala xiriir Barnaamijka Wacyigelinta Iskaashatada Bulshada (Community Partner Outreach Program) community.outreach@dhsoha.state.or.us ama adigoo wacaya 1-833-647-3678. Waanu aqbalnaa dhammaan wicitaannada dadka dhagaha adag ama waxaad garaaci kartaa 711.

Oregon Health Authority